[Somali]

Oktoobar 2018

Mudanayaal Waalidiinta/Koriyayaasha Ardayda Xannaanada Carruurta ilaa Fasalka 3,

Guddida Dugsiga Degmada Peel, waxaa naga go'an inaanu ku siino deegaanka waxbarasho ee ugu wanaagsan si *dhammaan* ardaydu ay u gaadhi karaan waxbarasho sare. Si taas loo sameeyo, waa inaanu si dhab ah u fahanaa baahiyaha ardayda iyo qoysaskooda. Si aad nooga caawiso shaqadan, waxaanu ku faraxsanahay inaanu ku dhawaaqno in bisha soo socota aanu bilaabayno *Tirakoobkii Ardayda* ee ugu horreeyay.

Noofembar, waalidiinta/koriyayaasha ardayda xannaanada carruurta iyo fasalka 3 waxaa la siin doonaa *Tirakoobka Ardayga oo* ay buuxiyaan iyaga oo ilmahooda (carruurtooda) ku matalaya. Badi qoysaska waxaa lagu gaadhsiin doonaa xog uruurinta kula jirta bushqad warbixinta waxqabadka ilmahooda. Haddii aanu kusoo gaadhin nuqul badhtamaha Noofembar, fadlan isla eega macallinka ilmahaaga.

Xog uruurintu waxay qaadan doontaa celcelis ahaan 30 daqiiqo buuxinteedu. Haddii aad leedahay carruur badan oo ku jira xannaanada carruurta ilaa fasalka 3, waxaa lagaa dalban doonaa inaad ilmo kasta mid gooni ah u buuxiso. Nuqul turjuman oo tirakoobka ah ayaa laga heli karaa dugsiga ilmahaaga ama websaytka guddida Peel: www.peelschools.org/studentcensus

Natiijada tirakoobku waxa ay guddida iyo dugsiga ka caawin doonaa:

- inay si wanaagsan u fahmaan ardayga iyo bulshada dugsiga
- in lagu ogaado oo meesha lagaga saaro caqabadaha guusha, ka wada qaybgalka iyo badqabka ardayda
- inay sameeyaan barnaamijyo wax ku ool ah iyo wareejin khayraad oo meesha ugu badan ee looga baahan yahay ah

Tirakoobka Ardaydu waa qarsoodi, laakiin haybta ciddu ma qarsoona. Dhammaan jawaabaha la uruuriyay waxaa lagu kaydin doonaa kayd-xogeed ammaan ah, sir ah oo kaliya waxaa heli kara shaqaalaha Cilmi-baarista ee loo oggol yahay si ay u ogaadaan oo ay usoo koobaan isbeddelada ardayda Peel. Xog uruurinta waalid kasta sidiisa loo naqdin maayo. Guddida Peel waxaa ka go'an inay gaadhaan heerka sirta ee ugu sarreeya marka ay uruurinayaan macluumaadka ardayda ku saabsan iyo inay raacaan dhammaan shuruudaha sirta ee lagu sheegey Sharciga Xorriyada Macluumaadka iyo Ilaalinta Sirta Dawladda Hoose (MFIPPA). Macluumaadka lagu heley *Tirakoobka Ardayga* waxaa lagu uruuriyay si waafaqsan Sharciga Waxbarashada nidaamka sharciga ah oo uu oggol yahay (R.S.O. 1990, c. E. 2, sida dib u eegid lagu sameeyay) kaliya wixii ujeeddo waxbarasho iyo cilmi-baariseed ah.

Ka qaybgalka *Tirakoobka Ardaydu* waa ikhtiyaar. Laakiin, waxaa muhiim ah in la ogaado marka kasta oo dadka buuxiyaa bataan oo macluumaad badani soo baxo, macluumaadka la helayaa waxaa badanaysaa culayskiisa iyo kalsoonida lagu qabo si dugsiga iyo qorshaynta barnaamijka loo hormariyo.

Haddii aad qabto wax su'aal ah, fadlan eeg xaashida macluumaadka ee warqaddan dhabarkeeda ku taal. Waxaad sidoo kale booqan kartaa www.peelschools.org/studentcensus ama kala xidhiidh waaxda Cilmi-baarista iyo Isla Xisaabtanka guddida Peel 905-890-1010 faraca. 3523 ama studentcensus@peelsb.com.

Sida caadada ah, waxaanu kuugu mahadnaqaynaa taageeradaada joogtada ah ee aanu guusha, kalsoonida iyo rajada arday kasta ku doonayno.

Peter Joshua
Agaasimaha Waxbarashada

Su’aalaha Badanaa La Iswaydiiyo

Waa Maxay Ujeedada *Tirakoobka Ardayga* ee Guddida Dugsiga Degmada Peel?

Natiijada tirkoobku waxa ay guddida iyo dugsiga ka caawin doontaa:

- inay si wanaagsan u fahmaan ardayga iyo bulshada dugsiga
- in lagu ogaado oo meesha lagaga saaro caqabadaha guusha, ka wada qaybgalka iyo badqabka ardayda
- inay sameeyaan barnaamijyo wax ku ool ah iyo wareejin khayraad oo meesha ugu badan ee looga baahan yahay ah

Su’aalo noocee ah ayaa ku jira *Tirakoobka Ardayga?*

Tirakoobka Ardayga waxa uu ka kooban yahay 30 su’aalo kala doorasho ah oo ku saabsan aqoonsiga ardayga, sifooyinka qoyska, waxa uu dugsigu uu u soo joogay iyo badqabka ardayga.

Ma inaan ka jawaabaa su’aal kasta oo tirakoobka ah?

Tirakoobka Ardaydu waa ikhtiyaar. Waad ka boodi kartaa su’aal haddii aanad doonaynin inaad ka jawaabto, ama waxaad dooran kartaa inaanad ka qaybgalin gebi ahaanba. Laakiin, waxaa muhiim ah in la ogaado marka kasta oo dadka buuxiyaa bataan oo macluumaad badani soo baxo, macluumaadka la helayaa waxaa badanaysaa culayskiisa iyo kalsoonida lagu qabo si dugsiga iyo qorshaynta barnaamijka loo hormariyo.

Waxaa iigu jira dhawr carruur ah xannaanada carruurta ilaa fasalka 3. Ma inaan ugu buuxiyo tirakoobka mid kasta gaarkiisaa?

Haa, waa inaad ilmo kasta gaarkiisa ugu buuxisaa tirakoobka. Xog uruurin kasta waa gaar, waxayna leedahay koodh gooni ah oo ku xidhiidhsan aqoonsiga arday kasta.

Carruurtaydu ma inay joogaanbaa marka aan buuxinayo xog uruurinta?

Ujeedada *Tirakoobka Ardaygu* waa in laga helo oo uu la socdo codka ardaygu. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad buuxiso tirakoobka adiga oo ilmahaaga la jooga si aad ugu darto aragtidiisa iyo waxa uu dugsiga kala kulmay.

Sidee jawaabahayga sir looga dhigayaa?

Xog uruurinta tirakoobka waxaa la socda meel magaca ilmahaaga la gelinayo—boggani waa ka kaliya ee uu la socdo magaca ilmahaagu ama wixii macluumaad ah ee kale ee sheegaya haybta. Tilmaamaha tirakoobka waxaa lagaaga dalban doonaa inaad ka saarto gelintan kahor inta aanad dhammaystirin tirakoobka oo aanad ku ridin kuna xidhin bushqadda. Buqshqadahan aad afka ka xidhay waxaa uu dugsigu gayn doonaa shirkad ka baxsan oo amni ah oo heshiis kula jirta guddida Peel si ay u sawiraan ugana hawlgalaan jawaabaha. Kayd-xogeedkan sirta ah waxaa geli kara Waaxda Cilmi-baarista kaliya si ay naqdin iyo cilmi-baaris ugu sameeyaan. Tallaabooyinkan waxay waafaqsan yihiin Sharciga Xorriyada Macluumaadka iyo Ilaalinta Sirta Dawladda Hoose.

Waa maxay farqiga u dhexeeya tirakoob sir ah iyo tirakoobka qarinta haybta cidda?

Tirakoobka Ardaydu waa sir, laakiin haybta ciddu ma qarsoona. Xog uruurinta tirakoobka waxaa lagu calaamadiyay koodh gaar ah oo ku xidhan lambarka aqoonsiga arday kasta. Koodhkan gaarka ah waxaa uu u sahlayaa Waaxda Cilmi-baarista ee guddidu inay naqdiyaan jawaabaha iyaga oo sidoo kale adeegsanaya macluumaadka hore loo uruuriyay (tusaale, cinwaan, luuqadaha guriga lagaga hadlo, fasalada, iwm.), taas oo keeneysa in si wanaagsan loo fahmo ardayda Peel. Wax sheegaya haybta shakhsi ahaaneed—sida magaca iyo lambarka aqoonsiga ardayga—laguma soo dari doono xog uruurinta si loo xaqiijiyo in macluumaadka waalidka/koriyuhu bixiyay uu sir noqdo.

Sidee macluumaadka tirakoobka loo isticmaali doonaa?

Marka jawaabaha nidaamka la mariyo ee la naqdiyo, Waaxda Cilmi-baarista ee guddida Peel waxay kasoo saari doonaan warbixino taxane ah si ay gacan uga gaystaan go’aan qaadashada guddida iyo dugsiga ee barnaamijyada iyo waxbarista. Macluumaadka lasoo koobay waxaa sidoo kale lala wadaagi karaa bulshada lala shaqeeyo iyo hay’adaha dawladda si kor loogu qaado tayada adeegyada si ay sida ugu wanaagsan uga jawaabi karaan baahiyaha bulshada. Warbixinaha ama naqdinta macluumaadka arday kaliya laguma bartilmaameedsan doono. Sharci ahaan, guddida Peel ma sheegi karaan macluumaadka shakhsi ahaaneed ee ardayga/waalidka buuxiyay tirakoobka.